

## KAADIDA 24 SAAC (24 HOUR URINE COLLECTION)

Waxa aanu ku dhiibi dhalo si aad ugu ururiso kaadida. Waxa kujiri kara dareere xafidis sagxadda dhalada, kaasi oo ay u dhawdahay inuu sun yahay.

- Haa gaadhsiin dareeraha maqaarkaaga.
- Carruurta ayeyna u dhawaan dhalada.
- Ha daadin dareeraha xafidista.
- Dhig dhalada meel qabow ilaa la gaynayo shaybaadhka.

### Sida loo ururiyo kaadida 24 saac

Ku bilaw shaqadan waxa kuugu horreeya subaxdii:

1. Ku kaadi musqusha. Kaadidan iyada lama rabo. Faaruqi kaydi-haystaada gabi ahaan.
2. Dhammaan kaadiga aad kaadido inta hadhay 24 saac waa in la ururiyo.
3. Haddii aad u baaahato inaad saxarooto, kaadi oo ururi kaadiga marka hore si aanad u dhumin.
4. Ururi muunadda kaadida u dambaysa 24 saac kadib ta hore. Xiitaa haddii aanad dareemayn baahida inaad kaadido kaadidan, waa inaad faaruqiso kaadi-haystaada gabi ahaan.
5. Ku calaamadi weelka magacaaga, taariikhda dhalasho iyo wakhtiga iyo taariikhda ururinta.
6. Si adag ugu xidh daboolka weelka.
7. Keen muunadda 24 saac iyo foomka codsiga shaqaybaadhka maalinta aad ururiso muunadda u dambaysa.

Fadlan kala xidhiidh shaybaadhka wayn wixii macluumaad dheeraad ah  
(04) 381 5900

**For all enquires please contact WELLINGTON SCL on 04 381 5900**

*Patient information - Instructions for 24 Hour Urine Collection – Somali*